OREGON DEPARTMENT OF
Human Services

# Tilmaamaha Taageerada

Jan. 21, 2026

OREGON PROVIDER Time Capture

Tilmaamahani waxaa loogu talagalay macaamiisha, wakiilada macmiilka-cidda loo shaqeeyo, shaqaalaha daryeelka guriga, iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Waxaa ku jira macluumaad ku saabsan:

- Sida loo isticmaalo nidaamka elektarooniga ah ee ilaalinta waqtiga oo loo yaqaano OR PTC DCI (Hal-abuurka Daryeelka Tooska ah ee La socodka Wakhtiga Daryeel Bixinta ee Oregon), iyo
- Cidda lala xiriirayo haddii aad u baahan tahay caawimaad.

## Tusmadda Qoraalka

Guudmarka ........ 2
Dooro ilaalinta waqtiga ee la kala dooranayo ........ 3
App-ka telefoonka gacanta ee OR PTC DCI ........ 3
Khadka telefoonka dhulka ee OR PTC DCI ........ 4
OR PTC DCI fob ........ 4
Taageero ma u baahan tahay? ........ 6

## Guudmarka

- OR PTC DCI waxay u taagan tahay Hal-abuurka Daryeelka Tooska ah ee La socodka Wakhtiga Daryeel Bixinta ee Oregon. Nidaamkani elektarooniga ah ee ilaalinta waqtigu wuxuu beddelay foojaradii warqada ahaa Sibtambar 2021.
- Isaga oo qayb ka ah Xeerka 21st Century Cures Act, dowladda federaalka ayaa u baahan in macluumaadka qaarkiis elektaroonig ahaan lagu soo ururiyo marka adeegyada daryeelka shakhsi ahaaneed la bixiyo. Shuruudani waxaa loo yaqaanaa Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah ama EVV.
- OR PTC DCI waxay qabataa/keydisaa macluumaadka soo socda si loo buuxiyo shuruudaha EVV federaalka:
    - Nooca adeega
    - Macmiilka helaya adeega
    - Daryeel bixiyaha bixinaya adeega
    - Taariikhda adeega
    - Goobta adeegyada, iyo
    - Waqtiga uu adeegu bilaabmo isla markaana dhammaado
- Waxaa jira kala doorashooyinka OR PTC DCI oo kala duwan oo la kala dooranayo si loo qabto/keydiyo waqtiga la shaqeeyay. Daryeel bixiyayaasha iyo macaamiishu waa in ay wada shaqeeyaan si loo helo hab si fiican u shaqeynaya iyaga. Waxaa dhici karta in aad isticmaasho habab badan haddii loo baahdo, laakiin waxaa in aad ku adkeysataa hal hab markiiba intaa aad ku jirto waqtigaaga shaqo. Tusaale, haddii aad saacada garaacato ‘clock in’ adiga oo isticmaalaya App-ka

Telefoonka Gacanta, waxaad u baahnaan doontaa in aad shaqada ka baxdo ‘clock out ‘adiga oo isticmaalaya App-ka Telefoonka Gacanta.

## Dooro ilaalinta waqtiga ee la kala dooranayo

### App-ka telefoonka gacanta ee OR PTC DCI

Nidaamkani telefoonka gacanta ee lacag la’aanta ah waa midka dadku ugu jecel yahay. Daryeel bixiyayaashu waxay maalin kasta isticmaali karaan nidaamkani telefoonka gacanta si ay saacada u garaacdaan ‘clock in’, shaqada uga baxaan ‘clock out’, u eegaan saacadaha una qoraan qoraalo. App-ka telefoonka gacanta gudahiisa, macaamiisha loogama baahna inay wax tallaabo ah qaadaan, laakiin way sameyn karaan haddii ay rabaan. Macaamiishu waxay haystaan kala doorashada ah in ay oggolaadaan iyaga oo isticmaalaya PIN/password ama saxiixa elektarooniga ah, ama wax tallaabo ah ma qaadi karaan.

App-ka telefoonka gacanta waa mid ay heli karaan dadka qaba naafanimada waxaana la heli karaa isaga oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Vietnamese, Arabic iyo Soomaali (luqaddo dheeraad ah ayaa lagu dari doonaa marka waqti la joogaba).

App-ka telefoonka gacantu wuxuu sidoo kale leeyahay qaab uu uusan meelna ku xirnayn ‘offline mode’ si daryeel bixiyayaashu saacada u garaacan ‘clock in’ karaan iyada oo uusan jirin ku xirnaanta internet-ka. Daryeel bixiyayaashu waxay sameyn karaan ilaa 10 gelis oo loogu talagalay ilaa 5 maalmood oo isku xiga iyada oo aanu jirin isku gudbinta xogta telefoonka gacanta ama ku xirnaanta WiFi. Raadi **OR PTC DCI** adiga oo ka raadinaya Apple App Store ama Google Play loogu talagalay Android.

Astaanta app-ka telefoonka gacanta ee OR PTC DCI:

## Khadka telefoonka dhulka ee OR PTC DCI

Haddii daryeel bixiyuhu uusan lahayn telefoon casri ah ama aalad casri ah, oo macmiilkuna haysto khadka telefoonka dhulka, Khadka telefoonka dhulka ee OR PTC DCI waa doorasho wanaagsan. Daryeel bixiyuhu wuxuu isticmaalaa khadka telefoonka dhulka ee macmiilka si uu geliyo waqtigiisa isaga oo raacaya tilmaamaha telefoonka. Tani waxaa loo isticmaali karaa gelinta waqtiga-dhabta ama si loo geliyo waqtiga maalmihii hore. Ogow: Si loo isticmaalo kala doorashadani, lambarka telefoonka ee khadka dhulka ee macmiilka waa in uu u dhigmaa lambarka telefoonka ee khadka dhulka ee haysto ODHS/OHA ee faylka ugu jira loogu talagalay macmiilka.

Lambarrada telefoonka ee khadka dhulka ee OR PTC DCI:

- Ingiriisi iyo Isbaanish: 844-856-9560
- Ingiriisi iyo Vietnamese: 833-640-1295
- Ingiriisi iyo Af-Ruushka: 844-334-7318
- Ingiriisi iyo Mandarin: 844-331-0241
- English iyo Arabic: 844-311-4160

## OR PTC DCI fob

Haddii macmiilku uusan lahayn khadka telefoonka dhulka oo uusan qofna heli karin aalad casri ah, daryeel bixiyayaashu waxay la socon karaan waqtiga iyaga oo adeegsanayo fob. Fob waa aalad yar oo mar kasta lagu hayo guriga macmiilka halka adeegyada laga bixiyo. Fob wuxuu sameeyaa astaamo 6-lambar ka kooban oo loo yaqaano “tokens” marka la joogo bilowga shaqada iyo dhammaadka wakhtiga shaqada oo kasta. Daryeel bixiyaha ayaa maalin kasta astaamahani ‘codes’ ku qora xaashi, ka dibna elektaroonig ahaan iyaga u geliya nidaamka internet-ka ee OR PTC DCI orptc.dcisoftware.com ka hor

dhammaadka muddada lacag bixinta. Marka ay noqoto macaamiisha, tallaabo looma baahna marka ay isticmaalayaan fob. Haddii loo baahan yahay fob macmiilka ama daryeel bixiyuhu waa in uu la xiriiraa maamulaha kiiska ee macmiilka si uu gudbiyo codsiga fob.

Marka la helo, fadlan fob ku xafid meel ammaan ah taasi oo ah goobta macmiilku ku helo adeegyada. Daryeel bixiyuhu waa in uu si fudud u heli karaa fob bilowga shaqad iyo dhammaadka wakhtiga shaqadiisa oo kasta. Macaamiishu uma baahna in ay qaadaan wax tallaabooyin ah oo kale.

Daryeel bixiyayaashu waxay u baahnaan doonaan in ay qoraan astaamaha’codes’ ee fob ay leeyihiin iyo taariikhaha iyo waqtiga la shaqeeyay. Waxaad heli kartaa xaashida shaqada ee fob ee lagu taliyay si aad macluumaadkani ugu qorto website-ka PTC, [ptc.oregon.gov](ptc.oregon.gov), ee ku jira qaybta Waxyaabaha Dhanka Waxbarashada. Xaashidani shaqada ayaa la helayaa iyada oo ku qoran luqaddo kala duwan. Ogow: Xaashiyada shaqada ee fob waxaa loogu talagalay in aad diiwaan ahaan u haysato oo kaliya loomana keeni karo xafiiska degaanka. Waa in aad macluumaadkaaga waqtiga shaqada iyo astaamaha ’codes’ ee fob gelisaa nidaamka internet-ka si laguu siiyo lacagta waqtiga la shaqeeyay.

Haddii aad heshay fob aanan shaqeynayn ama hawlgabay ‘malfunction’, fadlan la xiriir [ptc.support@odhs.oregon.gov](mailto:ptc.support@odhs.oregon.gov) ama xafiiskaaga degaanka.

Tixraac [Tilmaamaha Tixraaca ee Degdega ah ama Sida loo Isticmaalo Fob]() si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato sida loo isticmaalo fob.

Sawirka aalada fob:



## Taageero ma u baahan tahay?

Liiska Waxyaabaha Dhanka Waxbarashada ee Adeeg Bixiyaha ayaa leh ilo waxbarasho oo loogu talagalay daryeel bixiyayaasha oo ay ku jiraan Tilmaanta Daryeel Bixiyaha, Tilmaamaha Tixraaca ee Degdega ah (QRG-yada) oo dhowr ah, waxbarashada dhanka internet-ka, iyo fiidiyowyo.

OR PTC DCI waxay raacaan heerarka helitaanka ee federaalka waxaana lala isticmaali karaa akhriyayaasha shaashada. Waxaa la helayaa iyaga oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Vietnamese, Arabic, iyo Soomaali. Luqaddo dheeraad ah ayaa lagu dari doonaa dhawaan.

Waxyaabaha dhanka tababarka iyo xaashiyaha shaqada ee OR PTC DCI fob ayaa la helayaa oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Arabic, Farsi, Khmer, Korean, Lao, Nepali, Romanian, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish, Traditional Chinese, iyo Vietnamese.

**Buuxinta Agabka Barashada Bixiyaha ee La turjumay:**

- عربي (Arabic)
- 简体中文 (Simplified Chinese)
- 繁體中文 (Traditional Chinese)
- فارسی (Farsi)
- ខ្មែរ (Khmer-Cambodian)
- 한국어 (Korean)
- ພາສາລາວ (Lao)
- नेपाली (Nepali)
- Română (Romanian)

- Русский (Russian)
- Soomaali (Somali)
- Español (Spanish)
- Tiếng Việt (Vietnamese)

**Taageerada loogu talagalay Shaqaalaha Daryeelka Guriga (HCW-yada)**

Shaqaalaha Daryeelka Gurigu waa bixiyayaasha daryeelka guriga-dhexdiisa ee adeegyadooda la oggolaado iyada oo la adeegsanayo Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS).

La xiriir xafiiskaaga degaanka ODHS haddii aad hayso su'aalo ku saabsan qorshayaasha adeega, hawlaha, saacadaha la oggolaaday, siyaasadaha, cusbooneysiinta macluumaadka la iskala soo xiriirayo ama kaliya bilaabida daryeel bixiye cusub ama macmiil ahaan.

La xiriir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ee loogu talagalay su'aalaha iyo faallooyinka la xiriira macmiilka iyada oo la adeegsanayo Foomka Gudbinta Faallada ee OHCC ee internet-ka.

**Taageerada loogu talagalay Shaqaalaha Daryeelka Gaar ahaaneed**

Shaqaalaha Daryeelka Gaar ahaaneed waa bixiyayaasha daryeelka guriga-dhexdiisa ee hab-dhaqanka caafimaadka ee adeegyadooda la oggolaado iyada oo la adeegsanayo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA).

Haddii aad cusub tahay oo u baahan tahay in lagaa caawiyo bilaabida OR PTC DCI, oo jeclaan lahayd in aad xaqiijiso username-kaaga, ama qabto dhibaatooyin la xiriira lacag bixinta, fadlan la xiriir 503-945-9708 ama pc.20@odhs.oregon.gov.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan tirada saacadaha la oggolaaday, waxyaabaha la iska dhaafay, qorshaha adeega ama hawlaha, waxaad Comagine kala xiriirtaa 888-416-3184 ama orbhsupport@comagine.org.

**Miiska caawimaada DCI**

Wac 1-855-565-0155 ama email u dir orptcsupport@dcisoftware.com wixii caawimaad ah:

- Nidaamka hagista ee aasaasiga ah
- Gelida, iyo
- Qaladaadka nidaamka (boggaga fariistay' frozen', qaladaadka server-ka, iwm.)

**Taageerada La socodka Wakhtiga Daryeel Bixinta**

Email u dir ptc.support@odhs.oregon.gov haddii aad awoodi weydo in aad caawimaad aad u baahan tahay ka hesho mid ka mid ah ilaha kale.

---

Dukumeentigan waxaad ku heli kartaa luqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidayso bilaash. Kala xidhiidh Aging iyo Dadka Naafada ah apd.ltss@odhs.oregon.gov ama 503-945-5600. Waanu aqbalnaa dhammaan wicitaannada gudbinta.